Rowdada Sharafta leh

Rowdada sharafta leh waa halka u dhexeysa guriga Nabiga s.c.w. iyo minbarka Nabiga dherer ahaan ah 26.5 mitir ku dhowaad, waxaana lagu calaameeyey googol cagaaran. Nabigu s.c.w. wuxuu yiri isagoo ka hadlaya rowdada: *"Inta u dhexeysa gurigeyga iyo minbarkeyga waxaa ah beer ka mid ah beeraha Jannada"* (Al-Bukhaari 1137, Muslim 1390) marka waxaa sharci ah in lagu cibaadeysto halkaa oo lagula yimaado salaad iyo duco iyo qeyrkood cibaadooyinka.

Salaanta la salaamo Nabiga

Waxaa loo sharciyeeyey ziyaartaha inuu yimaado qabriga Nabiga s.c.w. oo qaabilo qolka Nabiga halka ay ku qoran tahay weedhan afka carabiga ah: (Halkan waa halka laga salaamo Rasuulka Alle s.c.w.) wuxuuna qofka ziyaartaha ah ku oroanayaa si edeb leh iyo cod gaaban: " As-Salaamu caleyka yaa Rasuulal Laah waraxmatullaahi wabarakaatuh: Waxaan marag ka ahay in dhambaalkii Alle dadka gaarsiisey, oo gudatay amaanada, oo waanisey ummadda, oo aad dadaal dheer oo dhan u gashay Ilaahay darti: ee Alle ha kaa siiyo ummadaada ajar kan ugu fiican ee Nabi laga siiyo ummaddiisa" Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: *"Ma jiro qof i salaamo uusan Ilaahay ii soo celin ruuxdeyda si aan uga qaado salaanta"* (w.w. Abuu Daawuud 2041)

Laah waraxmatullaahi wabarakaatuh: Waxaan marag ka ahay in dhambaalkii Alle dadka gaarsiisey, oo gudatay amaanada, oo waanisey ummadda, oo aad dadaal dheer oo dhan u gashay Ilaahay darti: ee Alle ha kaa siiyo ummadaada ajar kan ugu fiican ee Nabi laga siiyo ummaddiisa" Nabigu s.c.w. wuxuu yiri: *"Ma jiro qof i salaamo uusan Ilaahay ii soo celin ruuxdeyda si aan uga qaado salaanta"* (w.w. Abuu Daawuud 2041)

Nabigu s.c.w. ee isagu ah kan ugu fiican ee Nabi khaliifada Rasuulka